SOMALIA

Newsletter N°4
January 2009

Kalmadda Ku-xigeenka Wakiilkaa UNHCR Somalia, Vincent Chordi

Sannadkii 2008, dableyda hubaysan ama cabsidii joogtada ahayd, ayaa waxay horseedday bara-kaca dalka Soomaliya. Intii lagu guda jiray rubicii ugu dambeyey oo keliya, waxa magalaaga Muqdishu ka soo cararay in ka badan 70,000 qof, taasoo wadarta tirada dadka ka bara-kacay magaalada Casimadda ah ee Soomaliya ilaa bishii February 2007 ay garaysay ilaa 1 million qof. Sannadkii 2008, waxaa lagu qiyaasay ilaa 700,000 Soomaali ah inay ku bara-keceen dagaallada ama masiibooyinka dabiiciga ah, iyadoo daba-yaaqadii isla sannadkaasna dad gaarayey ilaa 300,000 qof, aya la xaqiijiyey inaysan dib ugu laaban goobihii ay asal ahaan ka soo qaxeen. Halka bisha January 2009, ay wadarta guud ee tirada dadka Soomalida ah ee gudaha dalkooda ku bara-kacay ay garaysay ilaa 1,3 million.

Wadarta guud e Soomaalida qaxootiga ku ah gobolka, ayaa ilaa imminka waxaa lagu qiyaasay ilaa 438,000 qof. sannadkii 2008, ugu yaran 100,000 qof oo Soomaali ah, ayaa qaxotinnimo weydiistay waddamada deriska kuwasoo kala ahaa sida hoos ku qoran : dad lagu qiyasay ilaa 58,000 qof oo soomaali ah, ayaa loo dammaanad qaaday aqoonsiga qaxoootinnimada dalka Kenya, iyadoo ilaa 29,000 qofna laga aqoonsaday dalka Yemen, halka dalka Ethioppia-na laga ogooladay ilaa 8,000 iyo ilaa 3,000 qof oo Soomaali ahna dalka Djibouti.

Dhanka kalena, in ka badan 50,000 qof – oo u badan muwadiiniin Soomaali ah – ayaa ka gudbay Gacanka Cadmeed min Soomaaliya ilaa dalka Yemen,waxaana gar-wadeen ka ahaa Tahriibleyda sharci-darrada ah. Tani waxay ahayd qiyaastii 70% kororsiimo garaysa marka lo eego sannadkii ka horreeyey inay gaareen dalka Yemen, taasoo laga dareemi karo sida ay dadkaasi ugu dulqaadanayaan dhibaatooyinka adag ee socdalkasi leyahay, iyado ay sabab u yihiin dhawr arrimmood oo ku khasbaya inay halistaas u bareeraan, waxaana ka mid ah; xasilooni la'aanta, masiibooyinka dabiiciga ah iyo dhibaatooyinka dhinaca dhaqalaha.

Intii lagu guda jiray sannadkii tegey, waxaa sii kordhayey jawiga nabadgelyo la'aanta iyadoo islamarkaana si weyn ay dhibatooyin ula soo gudboonaaneen dhinacyada badbaadada, gaaray dhaawacyo ba'an ay dadka kala soo gudboonadeen hawlgallada dhinacyada badbaada, gargarka iyo adeegyada daka bara-kacay(IDPs) qaxootiga iyo dadka magan-gelyo doonka ah, waqtigaas oo ku soo beegmay xilligii ay ugu baahida badnaayeen. Hoos-u-dhaa hawlaha bini'aadminnimada oo ay sabab u ahaayen cabsi-gelinta tooska ah, weerarrada, af-duubka – waxana ka mid aha af-duubkii shaqaale ka mid aha UNHCR ee dhinaca Afgooye – iyo dilkii sida toos ah loogu gaystay shaqaalihii hay'adaha UNDP, WFP iyo UNICEF iyo sidoo kale asxaab kale oo iyaguna ka tirsanaa hay'adaha an dawliga ahayn(NGO) ee maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ahba, kuwaasoo samayn lixaad leh ku yeeshay hawlaha hay'adaha gargaarka bini'adminnimada. Hase yeeshee, walow mugdi uu saameyey hawlgalladaas sannadkii 2008, haddana hay'adda, UNHCR waxay si joogto ah u sii wadday gargaarkii dhinaca samafalka ahaa ee dadka tabaalaysan loogu talo galay. Inkastoo uu gaabinayey hannaanka adeegyada gargaarka lagu gaarsiinayey, balse marna adeegyadaasi ma hakanin, waxana mahaddeeda iska leh hawlgallada hufnaanta leh ee ay muujiyeen shaqaalaha UNHCR iyo la-hawlgalayaasheeda, iyadoo sidoo kale ay mudnaan dheeraad ah leeyihiin dadaallada wax-ku-oolka ah ee lagu horumarinayo qaababka dib-u-soo-noolaynta adeegyaads iyaga ah.

Dhacdooyinka dhinaca siyaasadda oo aan la sii sadaalin Karin awgeed iyo is-beddellada xawliga leh ee Soomaaliya, haddana waxaa ilays rajo leh uu ka muuqdaa horumarka jawiga nabadgelyada goobaha qaarkood. Sida ay tilmaamayso xog ay soo uruuriyeen la-hawlagalayaasha maxalliga ah, ayaa waxay markii ugu horreysay xustay in dad badan oo hore ugu bara-kacay Magaalada Muqdishu ay bartamihii January ay bilabeen inay dib-ugu-soo-noqdaan qaar ka mid ah degmooyin ka tirsan magaalada Muqdishu. Waxana lagu qiyaasay dad garaya ilaa 4,700 qof inay guryahooda ku soo laabten. Waa arrin niyadsami leh inay dadkaasi dib-ugu-soo-laabtaan guryahooda ee degannada nawaaxiga magaalada ku yallay, halkaas oo ahayd goobihii muddo aan sidaas u si fogayn ay kala kulmeen dagaalllo iyo xad-gudubyo ka dhan ah bini'aadminnimada. Waxaa keliya ee aan dadkaas u rajaynaynaa waa in saan-saanka wacan e hatan muuqdaa uu u horseedo jawi lagama maarman ka dhigi kara inay soo if-baxaanuu muujinayo.

UNHCR iyo SRCS oo galabaan cunto ahayn (NFI) ka qaybisay Marka

Hay'adda qaxootiga QM ayaa gargaar galabaan cunto ahayn ah u qaybisay 22kii December, dadka bara-kacay oo gaarayey ilaa 8,000 qof ee ku nool degmada Marka, oo iilaa 100Kilomitir Kofur-galbeeed ka xigta magaalada Muqdishu. Waxaana gargaarkaas ka faa'iidaystay dadka ku dhaqan nawaaxiga Marka iyo Shalambod, oo ah tuulo yar oo ku taalla duleedka magaalada, ilaa intii ay ka soo carareen dagaalladii Muqdishu ee u dhexeeyey ciidamada Ethiopian-ka oo gacan siinayey dawladda federaalka ku-meel-gaarka ah iyo xooggagga ka soo horjeeda. Waxayna ku qaadt dhawr bilood in hay'adda UNHCR dib isu soo abaabusho hawgalka gargaar qaybinta, sababo fara badan oo dhinaca ammaanka ah awgeed.

Waxaana Qoysaskaas loo qaybiyey qaar ka mid ah qaadatay qalab aan cunto ahayn sida, bacda guryaha lagu dhisto,bustayaal, dermooyinka la goglado iyo maacuunta wax lagu karsado, kuwaasoo hawlgalka qaybinta ay ka qaybgashay hay'adda Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS). "*dadweynaha ku waxyeeloobay rabshadihii argagaxa lahaa ee Muqdishu, waxay mudan yihiin inay helaan nolol ku habboon heer-nololeedkooda kaddib marka ay soo gaaraan degmada Marka*", sidfaas waxa yiri mid ka mid ah shaqaalaha maxalliga ah ee UNHCR. "waxaan ka caawinnaa sidii ay u dhisan lahayeen hoygooda, sidaas awgeed waa inaan carruurtoodu ku dhibtoonin roobabka."

Magalada Marka, waxaa hareereeyey Dooxo yar oo u dhaxaysa badweynta Hindiya iyo dhawr buurood oo aan ku habboonayn in hoy laga dhisto, taasoo ay sabab u tahay halis dheeraad ah oo dhinaca daadadka dhoobada.

Wata Waxaana arrintaas lagu macnayn karaa inay goob yar ay u bannaan tahay dadka cusub ee soo bara kacay, taasoo dhaxalsiisay in qoysaska intooda badan ay ku nool yihiin deegaanno ciriiri ah oo aan faya-dhawr haboon iyo biyo lacabo oo nadiif ah lahayn. Waxaana (.../)



Bacda guryaha lagu dhisto, waxay dadka bara-kacayaasha ah (IDPs) ka caawisaa dhismaha hoygooda marka ay roobabku ra'ayaan, iyadoo ka hortagta dumista ay inta badan sababaan biyaha baaxadda leh ee dusha kaga hooraya marka ay roobabku da'ayaan.

(/…) magaaladaas yar ee xeebta ku taal waxaa ku nool ilaa 30,000 qof oo dadka bara-kacay ah. "*Dad badan ayaa Marka u soo aaday,si ay ugu biiraan xubno ka mid ah qabiilka ay ka soo jeedaan awgiis oo laga yaabo inay kaalmo ka helaan*", sidaas waxaa tilmaamay xubin ka mid ah shaqaalaha UNHCR. "*Qaar kale oo dadkaas ka mid ah ayaa halkaas u tegey, sababtoo ah horay ayay magaalada ngn noolaan jireen*". Waxayna qoysasku sahan u dirsadaan qof ka sii hormara, si ay ugu raadiyaan goob ay hoy ka dhistaan,ooay nabadyelyo nfn noolaadaan. Kaddib marka uu soo sahmiyo xaaladda deegaankas, ayaa waxaa dabeed soo guura qoyska oo dhan.

Waxay shaqaalaha UNHCR warbixintooda ku tilmaameen, in magaalada Marka ay mashquul ku ahaan jirtaya dibad u dhoofinta dalagyada beeraha, labadaraadle waddamada reer Yurub, iyadoo soo jiidatay shaqaale fara badan. Sannadihii 80-yadii waxaa loo wareejiyey ganacsiga dibad wax u dhoofinta kaddib markii la ballariyey dhismaha dekedda Cusub ee magalada muqdishu, iyadoo alad badan ke teguy Marka oo aaday ceesinodde. Dadkaas oo imminka dib ugu soo laabanaya magaalada yar ee xeebta ku taal, iyadoo nabadgelyo raadinaya. Waxaa keliya ee fursad u heli kara inay ka tagaan Muqdishu dadka heli kara gaadiid ama Gaari-dameer ay ku gaaraan magaalada Marka, halka dadka saboolkaah ay weli halkaas ku dambeeyaan ama ku hareen. "*Mar haddii aysan Marka imminka ahayn magaalodhayaalaha badnayd, waxay dadka cusub ee imminka ku soo bara-kacay ay la kulmaan waqti adag iyagoo raadinaya sidii ay ku heli lahayeen heer-nololeedkooda, iyadoo si weyn ugu dadalaya khayraadka xaddidan ula wadaagi lahaayeed dadka martida loo yahay, labadaraadle biyaha nadiifka ah*", intaas waxaa raaciyey mid ka mid ah shaqaalaha UNHCR. Ma jiro qof ka mid ah dadka soo bara-kacay oo danaynaya inuu dib ugu laabto Mogadishu mustaqbalka la saadalin karo, maadaama ay dad hor leh weli ka soo cararayaan caasimadda, dagaallada halkaas imminka ka soconaya awgood. Ugun yaraan ilaa 70,000 qof ayaa Muqdishu ka soo cararay rubicii ugu dambeeyey sannadkii 2008, taasoo sare u sii qaadday tiro ka badan ilaa hal Milyan oo qof oo bara-kacayaal ah.
Qoysaska ku soo bara-kacay magaalada Marka, ayaa waxaa la soo gudboonaaday walaac dheerad ah oo xagga nolosha ah.. "*Waxay guryahoodii kaga soo tageen Muqdishu si ay ugu noolaadaanbuulasha xaafadaha isku-raranta ah ee hareeraha waddooyinka ku yaalla, iyagoon haba yaraatee wax rajo ah ka qabin mustaqbal habboon oo ay ku noolaan karaan, islamarkaaa uusan jirin dugsi waxbarasho ay carruurtyooda gaystaan*", sidaas waxaa qeexaya mid ka mid ah shaqaalaha gargaarka maxalliga ah. Si kastaba ha *dib* ahaatee, madaama uu sannadkii cusbaa bilowday, qaar ka mid ah ayaa muujinaya rajo wanaagsan. *"waxay ogyihiin inaysan maalinta berrito ah ugu noqon doonin Muqdishu, balse waxay ka fekerayaan in tallaabooyin is-beddel dhinaca siyaadda ah lagu tallaabsan karo, tasoo hore loogu marin karo mustaqbalka dalka oo xal waara lagu gaari karo mustaqbalka*", sidaasna waxaa raaciyey mid ka mid ah shaqaalaha gargaarka maxalliga ah. "dadkaasina weli kama aysan quusan inay mar kale dib u dhistaan guryahoodii magaalada muqdishu oo ay ku noolaadaan."

UNHCR waxay Taageertaa Talo-bixinta Cilmi-nafsiga ee Bossaso

Dhibaatooyinka waxyeelada dagaalka kadib iyo walwalka joogtada ah, ayaa aad ugu sii kordhaya dadka soo bara-kacay iyo qaxootiga dalka Soomaaliya. Qaarkood waxaa la weerara intii ay dagaalladu Muqdisho ka socdeen ama xeryaha go'doonka ah ee ay ku noolaayeen ee duleedka magaalooyinka. Rugaha caafimaadka yar yar ee haweenka, ayaa inta badan la weydiistaa inay daaweeyaan haweenka miyir-door-soomay, kaddib markii xad-gudubyo kufsigu ka mid yahay loo gaystay iyo kuwa ay qoysaskoodu garan la' yihiin sidi ay iyaga u caawin lahaayeen. Baahida loo qabo talo-bixinta Cilmi-nafsiga ee dadka bara-kacay ee maskaxdoodu waxyeelowday, ayaa waxay UNHCR u horseedday inay ka maalgeliso mashruuc gaar ah magalada Bossaso, Puntland, iyadoo u sii marinaysa la-hawlgalayaasha oo kaashanaya hay'adda aan dawliga ahayn(NGO) ee Talyaaniga ah ee lagu magacaabo-Gruppo per le Relazioni Transculturali (GRT).
Sannadkii 2008, xarun gaar ah oo si buuxda loo qalabeeyey, ayaa la furay. Waxaana imminka ka socda hawlgallada dhinaca bulshada iyo maaweelada ee loogu talo-galay carruurta iyo da'yarta. Waxaana la dhisay afar kooxood oo kubadda cagta ah, iyadoo ay bar-bar socdaan fasallada sawir-gacmeedka iyo curiska qoraallada sheekooyinka oo toddobaadkiiba labo goor ay gabdhaha iyo wiilashuba qaataan. Waxaana si joogto ah loo baahiyey talo-bixinta cilmi-nafsiga oo ay ka mid yihiin; casharrada naqtiinka iyo booqashada Guriga ee xeryaha dadka soo bara-kacay oo ay weheliyaan hab-raacyada is-dhexgalka iyo taageerada baahida asaasiga ah. Marka loo baahdo, waxaa bukaannada loo gudbiyaa Waaxda Caafimaadka Dhimirka ee Cisbitaalka guud ee Bossaso, , waaxdaasna waxaa asaastay GRT sannadkii 2003, waana Adeegga keliya ee Cudurrada Dhimirka ee Soomaaliya ka jira. Maadaama ay hawleheda ka mid yihiin; awoodaynta xirfadaha iyo kobcinta aqoonta, waxay hawlwadennada buldhashu u xilsaaran yihiin;Taageerada iyo Talo-bixinta Cilmi-nafsiga ee Puntland, iyagoo bixiya tababarro ku wejahan horumarinta hab-raacyada dhaqan-celinta eek u salaysan dhaqanka Soomaalida. Daraasadaha baahida wadjirka ah ee dhinaca dhaqan-celinta dadka bara-kacay, ayaa laga sameeyey shanta xero ee dadka

bara-kacay ee Bossaso. Siddeed ka mid ah bukaannada cunyaamay,ayaa loo soo qaaday xarunta Dhaqan-celinta Curyaamiinta Galkayo. Sannadkii 2008, xarun gaar ah oo si buuxda loo qalabeeyey, ayaa la furay. Waxaana imminka ka socda hawlgallada dhinaca bulshada iyo maaweelada ee loogu talo-galay carruurta iyo da'yarta. Waxaana la dhisay afar kooxood oo kubadda cagta ah, iyadoo ay bar-bar socdaan fasallada sawir-gacmeedka iyo curiska qoraallada sheekooyinka oo toddobaadkiiba labo goor ay gabdhaha iyo wiilashuba qaataan. Waxaana si waxaa bukaannada loo gudbiyaa Waaxda joogto ah loo baahiyey talo-bixinta cilmi-nafsiga oo ayka mid yihiin; casharrada naqtiinka iyo booqashada Guriga ee xeryaha dadka soo bara-kacay oo ay weheliyaan hab-raacyada is-dhexgalka iyo taageerada (…/)

(/...) baahida asaasiga ah. Marka loo baahdo, Caafimaadka Dhimirka ee Cisbitaalka guud ee Bossaso, waaxdaasna waxaa asaastay GRT sannadkii 2003, waana Adeegga keliya ee Cudurrada Dhimirka ee Soomaaliya ka jira. Maadaama ay hawleheda ka mid yihiin; awoodaynta xirfadaha iyo kobcinta aqoonta, waxay hawlwadennada buldhashu u xilsaaran yihiin;Taageerada iyo Talo-bixinta Cilmi-nafsiga ee Puntland, iyagoo bixiya tababarro ku wejahan horumarinta hab-raacyada dhaqan-celinta eek u salaysan dhaqanka Soomaalida. Daraasadaha baahida wadjirka ah ee dhinaca dhaqan-celinta dadka bara-kacay, ayaa laga sameeyey shanta xero ee dadka bara-kacay ee Bossaso. Siddeed ka mid ah bukaannada cunyaamay,ayaa loo soo qaaday xarunta Dhaqan-celinta Curyaamiinta Galkayo.

"Dadka Soomaalidu, waxay bilaabeen inay xaqiijiyaan in Cudurrada Dhimirka la daweyn karo, xitaa xeryaha dadka bara-kacay(IDPs)"

Massimiliano Reggi, oo ah Dhakhtar Cudurrada Dhimirka ee GRT iyo la-taliye Cilmi-nafsiga ah, islamarkaana gacan ka geystay hirgelinta mashruuca Bossaso, ayaa faahfaahin ka bixiyey qaabka ay u caawiyeen, ayna isu beddeshay nolosha bukaannada cudurrada Dhimirka, labadaradle, xeryahay dadka bara-kacay.

Sidee a loo arkayey Cudurrada Dhmirka ee Puntland ka hor intii aan la bilaabin mashruucii koowaad ee caafimaadka Dhimirka sannadkii 2003 ?

Adeegyada Cudurrada Dhimirku, kama jirin Puntland, wixii ka horreeyey 2003. Marka la arko dadka ku dhaqma noocyada qalafsan ee waallida sida qaawanaanta ama caadaysiga rabshada, go'doonka, cabsida xad-dhaafka ah iyo wixii la mid ah, waxaa la gayn jiray xarumaha Quraanka lagu saaro ama xarumaha daawo dhaqaameedka, iyadoo dadka qaraabada la ah bukaanku ee awoodaa ay bixin jireen kharajka daaweyntooda, hase yeeshee, haddii aysan bukaannadaasu ku bogsanin dadaallada caynkaas ah, waxaa lagu xir-xiri jiray hadba wixii suuragal ah ee la heli karo sida, geedka jirriddiisa, qayb bir ah oo dhulka lagu shamiinteeyey, guri weyn oo matoorada makaanikada loo adeegsado ama hoy aan rasmi ahayn oo ku dhex yalla xeryaha dadka bara-kacay. Waxaa hal mar arkay bukaan la katiinadeeyey muddo ka badan ilaa 13 sano ah.

Bukaanka qaba cudurrada Dhimirka waa laga karantiili jiray bulshada kale. Iyadoo katiinaddana loo adeegsan jiray aaladda ugyu habboon, mararka qaarkoodna waxayba ahaan jirtay wax si joogto ah loo isticmaalo, maadaama uu qofku ku xasilayo/nagaanayo, isagoo aan baxsan karin/carari karin am aaan cid kale waxyeelayn karin marka uu xidhan yahay, taasoo ahayd Istraatiijiyada qudha ee qofka lagu ilaalin karo, islamarkaana suuragal ka dhigaysa in isaga/iyadu aysan wax khasaare ah gaysan, si markaas an qoyskiisa mag-dhaw looga qaadanin. looma tixgeliyo in cudurrada Dhimirku ay wax dawo ah leeyihiin, waxayna bukaannadu ku sugnaadaan xaalad qalafsan oo si joogto ah caqabad ugu noqoto qofka buka. Si kastaba ha ahaatee, murugadan xanuunka badan, uma gudubto xubnaha kale ee qoyska, tas macneheedu, waa inan lagu katiinadayn karin mid ka mid ah xubnaha qoyskiisa si looga qariyo isaga/iyada bulshada inteeda kale, iyadoo wax ceeb ah loo arko.

Cudurrada Dhimirku, ma waxay ahaayeen kuwa ku baahsan Soomaaliya, wixii ka horreeyey sannadkii 1991, kaddib markii ay burburtay Dawladdii Madaxweyne Siyad Barre,ayna dagaallada sokeeye dheceen ?

Waxaa wax badan la sii sheegay inaysan taasi jirin, iyadoo qaabab cusub oo Cudurrada dhimirka ahna ay so if-baxeen wixii ka dambeeyey 1991. dagaallada iyo xaaladahan qalafsan ee dawlad la'aanta daba-dheeratay iyo halista faraha badan ee dhinacyada xiriirka bulshada, istraatiijiyadaha isku-dayashada ah/nuqullada isku-eg leh iyo nidaamyada daaweynta ayaa heerar kala duwan gaaray. kuwasoo sidoo kale hoos u dhigay suralnimadii dib-u-soo-kabashada.

Miyaa arrimahan wax iska-beddeleen ilaa intii Mashruuca la hirgeliyey?

GRT/V. Turrisi

Nin soomaali ah oo aan asxaab nahay, ayaa mar is-bar-bar-dhig ku sameeyey Cudurrada Dhimirka iyo Qaaxada(TB) : 10 sano ka hor, waxay Soomaalidu rumaysnayd inaysan wax daawo ah lahayn, balse imminka waa la daaweyn karaa, waana la heli karaa daawada cudurkaas. sidoo kale arrimaha la xiriira cudurrada Dhmiriku iyaguna waa ay is-beddeli karaan. waxaan samaynay ololayaal wacyi-gelineed oo heerar kala duwan leh. dadku waxay dhagaysteen tallabooyinka cusub ee suuragalka ah e lagu soo bandhigi karo baahida asasiga ah ee bukaanada Cudurrada Dhimirka qaba. Waxaana u soo baxay oo si wacan macluumaadkaas uga faa'iidaystay dad aad iyo aad u fara badan .

Waxay UNHCR-maalgelisay mashruuc bartilma-ameedkiisu yahay qoysaska bara-kacay(IDPs).

Dadka bara-kacay, waxay qabatimeen inaysan xakamayn karin baahida heer-nololeedkooda, iyagoo aaminay la qabsiga jawiga nolosha saboolnimada ah ijaangooyada nadaafadda. Waxana ku adkaatay inay cid kale aaminaan, iyagoo rumaysan inay keligood isku tashtaan oo xalka iyagu un raadsadaan dhibatooyinkooda. mana isku dayaan inay dhibaatooyinkaas kaalmo u raadsadaan. Taasina waa sababta lagama marmaanka ka dhigtay in ololayaasha wacyi-gelinta ay lamaga maarman u yihiin xeryaha dadka bara-kacay(IDPs). waxayna tallaabadasi horseedday natiijooyin togane ah, iyadoo dadkuna ay bilaabeen inay wax ka bedelaan dhaqamadoodii, islamarkaana ay diyaar u yihiin inay taageero weydiiistaan adeegyada lacag la'aanta ah ee imminka jira, kuwaasoo oo ay ka mid tahay Waaxda Caafimaadka Dhimirka ee Cisbitaalka Bossaso.

Waxaa hore loo qaday tallaabo muhiim ah, kaddib markii ay dadweynuhu bilaabeen inay rumaystaan in natiijooyin wax-ku-ool ah laga gaaray aqaar ka mid ah qaab abka daaweynta tayada leh. waxayna indhohooda ku arkeen in dadkii ay bulshadu u taqaanay wax-ma-tarayaan, ay imminka ka muuqdaan calaamado yiddidiilo iyo horumar leh. waxayna bilaabeen inay soo bandhigan dadaallo ay wax kaga ogaanayaan adeegyada jira ee awood u siin kara is-beddelo togane ah oo ay ka faa'iidaysan karaan qoysas badan oo bukanadaasi oo kale u joogaan. Idaacadaha Soomalida iyo wargaysyaduba waxay bilaabeen inay ka hadlaa arrimaha mawduucan la xiriira, kuwaasoo u muuqda inay yihiin guulo laga gaaray sidii loo bilaabi lahaa daryeelkii ay bulshadu u baahnayd.

Waa maxay goobaha kale ee uu mashruucu ka hawlgalo ?

Wuxuu kaloo mashruucani ka hawlgalaa arrimaha la xiriira Cilmi-nafsiga, gaar ahaan, xeryaha dadka bara-kacay(IDPs). wuxuuna gacan ka gaystaa awoodaynta xirfadaha aqooneed iyo shabakadaha hay'adaha maxalliga ah ee aan dawliga ahayn(NGOs)sida; Gudbinta iyo is-dhaafsiga khibradaha Caafimaadka Dhimirka iyo xarumaha daaweynta cilmi-nafsiga ee shaqaalaha soomaalida ee ka soo jeeda gobollada kala duwan ee dalka. waxay bixisaa tababarro ku wejahan caafimaadka dhimirka, Mawduucyada Cilmi-nafsiga iyo xad-gudubyada ka dhanka dhaddeg-laboodka. Waxaanan hirgelinnay xarun isku-xirta hawlgallada oo dhan, taasoo ah xuddunta gudbinta bukaanka ee Bossaso iyo Puntland. waxaan kaloo abaabulnaa hawlgallada dhinaca bulshada ee xeryaha dadka bara-kacay(IDPs).

Tahriibka Isku-Dhafan

In ka badan 50,000 qof, ayaa si sharci-darro ah uga gudbay Gacanka cad-meed sannadkii 2008. tani waxay ahayd koprorsiimo ka badan 70 % dadkii halkas tegey sannadkii ka horreeyye. – markaas oo ilaa ugu yaraan 30,000 qof ay socdaalkaas sameeyeen.– waxayna arrintasi caddaynaysaa xaaladda ba'an ee uu dalka Soomaaliya ku sugan yahay, iyadoo ay sii kordhayso cabsida xad dhaafka ah ee dhinacyada ay ka midka yihiin; dagaallada, degenaan la'aansdhaha, masiibooyinka dabiiciga ah iyo saboolnimada. Sannadkii 2008, ilaa 590 qof oo rakaab ahaa aya ku qaraq-may badaha, iyadoo ilaa 390 qof la sheegay in la la yahay meel ay ku dambeeyeen.. tirade dhimashada , ayaa six ad sdhaaf ah u sii kordhaysay sannadkii tegey, halka ilaa 1,400 qof la xaqiijjiyey inay dhinteen. Si kastaba ha ahaatee, waxaa mar kale la sheegayaa in in dad badan la garaacay ilaa intii ugu dambayntii ay geeriyoodeen ama laga tuuray doonta korkeeda, iyadoo ay falkaas gaysteen dadka sida Tahriibka sharci-darrada ah ka shaqaysta. Sannadkii 2008, waxay hay'adda UNHCR si joogto ah u wadday ololayasha wacyi-gelinta dadka tahriibka ah iyadoo warbaahinta u adeegsatay, ayna horsed ka ahaayeen hawlwadeennada Tahriibka Isku-dhafan (MMTF). Waxaana si weyn loogu dhiirigeliyey dadka magan-gelyo doonka dhabta ah inay codsiyadooda dhinaca qoxootinnimada u gudbiyaan Puntland, iyadoo dadka qoxootiga ah looga digay halista ka soo fool leh socdaalka Badda iyo shaqo la'aanta ka jirta dalka yemen. Qoraallo cusub ayaa loogu talo galay in loo qaybiyo sannadkan 2009. Waxaana Koofurta/bartamaha Soomaaliya ugu qaybin doona hay'adaha an dawliga ahayn ee NRC iyo Intersos.

Bara-kaca Galgaduud

Bishii December, dad lagu qiyaasay 120,000 qof oo Soomali ah ayaa ku bara-kacay Galgaduud, waana gobolka ugu ballaaran ee ay ugu tirada badan yihiin dadka bara-kacay marka loo eego bartamaha Soomaliya, kaddib markii ay dagaalladu dhexmareen Al-Shabaab iyo Maleeshiyada Ahlu-Sunna Wal-Jamma. Qaar badan oo bara-kacayaashaas(IDPs) ka mid ah ayaa mar hore dib ugu laabtay guryahoodii, madaama ay xiisadihii colaadeed yaraadeen, halka kuwa kalena la filayo inay si deg-deg ah dib ugu laaban doonaan.
Waxayna hay'adda UNHCR siisay qalab aan cunto ahayn gaaraysa ilaa 2,710 shay dadka ku bara-kacay Galgaduud, iyadoo u sii marisay hay'adda aan dawliga ahayn ee Horumarinta hawlaha bini'aadminnimada Soomalida(SOHDO), kuna taageertay codsigeedii gaarayey USD 23,462 ee laga bixiyey Min santuukha HRF.

Badbaadinta Qaxootiga ee 2009

Qaraxyadii is-miidaaminta ahaa ee lagu qaaday Hargaysa iyo Bossaso bishii Oktober 29keedii aya si ba'an u waxyeelaysayhannaanka xaqiijinta aayatiinka dadka Qaxootiga ah ee ku dhaqan labada deegaan ee Somaliland iyo Puntland. Kaddib markii laga dad-gureeyey Shaqaalihii caalamiga, iyadoo shaqaalaha maxalliga ahna ay caqabado cusub la soo gudboonaadeen, waxaana la hakiyey waraysiyadii lala yeelanayey dadka qoxootiga magan-gelyo doonka ah. Hay'addaa UNHCR, ayaa waxay qorshaynaysaa inay u dirto ergada RSD o ka kooban shaqale caalami ah – oo dhawan loo soo raray Nairobi – oo labada gooboodba laga kala keenay si ay u sii wadan waraysiyadii dhinaca dadka qaxootiga magan-gelyo doonka ah toddobaadyada soo socda. Hay'adda QM u qabilsan Qaxootiga,ayaa waxayu xilsaaran tahay hawlaha RSD ee Somaliland iyo Puntland, maadama mamullada maxalliga ahi, aysan ilaa imminka awood u lahayn maaraynta inay arrintaas. Si kastaba ha ahaate, qaxootiga magan-gelyo doonka ahi, waxa u diwangashan yihiin, Gudiga Qiimaynta xaaladda Qaxootinnimada(REC) ee Somaliland iyo Guddiga Arrimaha Qaxotiga (RAC) ee Puntland, iyadoo xubnahasi ay ka fa'iidaystan tababarrada iyo aqoon-korosiga ay bixinaysay Hay'adda UNHCR sannadihii la soo dhaafay. Waxana jirta bahi la xiriirta awoodaynta tababarrada iyo u ololaynta danaha qaxootiga e ku wejahan madaxda her degan e dhammaan heerarka kala duwan e ka hortaga qab-qabashada qaxotiga oo inta badan cado u ah Geska Afrika, taasoo iyadu curyamisa badbaadada dadka ay hay'adda UNHCR dananayso.

Sido kale hawlaha diiiwaangelinta qaxotiga magan-gelyo doonka ah ee Somaliland, ayaa waxaa u xilsarn wasaradda, aya laga fuliyo magalo-madaxda Garowe, iyadoo adeegyada gadiidku ay lacag la'aan yihiin, kuwa ku nool magaalada dhinaca waqooyi ee Dekedda Bossaso. Guddiga Arrimaha Qaxootiga(RAC) ee xaruntodu tahay Garowe, ayaa dhawaan la filayaa inay hawlgal u aadan magalada dhanka kofureed e Galkacyo, halkaas oo sida ay xaqijiyeen shaqaalaha UNHCR ay baahi dheeraad ah oo dhinaca magan-gelyo doonku ka jirto.

Dib-u-dejinta dal seddexaad, wa xalka keliya ee kama dambaysta ah e inta badan qaxootiga o badankoodu ka yimid dalka Ethiopia. In is-dhexgal ay la sameeyaan bulshada deegaanka, ayaa ah tallaabo adag, maadama aysan jirin awood maxalli ah o ay ku dhex-geli karan, iyadoo xaladda dhaqaluhu liidato, halka dadka tabaruc ahaan u doonaya in dib loogu celiyo dalalkoodina, aysan suuragal ahayn waqtigan xaadirka ah.

Arrinta dib-u-dejinta la xidhidhta, ayaa ka mid ah arrimaha cadaadiska adag u ka taagan tahay dhanka Hargeisa ilaa intii qaraxyadu ay ka dhecen. Inkastoo mamulka deegaanku uu dadweynaha ugu baaqay inaysan xad-gudubyo ka dhan ah qaxootiga,magan-gelyo doonka ama bara-kacayaasha(IDPs) haddana waxa sare u kacay cadawada bo hayo, iyadoo qaar ka mid ah ay dareemayaan nabadgalyo la'aan, waxayna ka cabanayaan in qaar ka mid ah dadweynuhu ay iyaga weeraradaas ku eedaynayaan, sidaas darteedna ay bartilmaameed ka dhigan doonaan.

Gargarka loo fidiyey magan-gelyo doonka, iyadoo loo aqonsaday qaxootiga iyo bara-kacayashaba mudnantoda garkaa h, ayaa mahadi ha ka gaartee waxaa ku ammaanan asxaabta deegaanka iyo la-hawlgalayasha gudaha dalka ku sugan. Wuxuna aqoonsigaasi faa'iido gaar u yeeshay qaxootiga oo helay adeegyada ay ka mid yihiin; Daryeelka Caafimadka Asasiga ah, Waxbarashada Carruurta, Fasallada qoris-akhris la'anta iyo Tababarrada Farsamad Gacanta ee daka waaweyn, la talinta dhanka sharciga oo lacag laa'aan ah, ka hortagga iyo gurmadka SGBV iyo HIV/Aids.

Somaliland, oo shaqo la'aanta lagu tilmaamay inay gaadhsiisan tahay ilaa 80% marka loo eego guud ahaan dadaweynaha, ayaa waxay UNHCR gacan ka gaysataa gunnooyin yar yar oo lagu samata-bixinayo dhammaan qaxootiga. Iyadoo uu dhaqaaluhu xaddidan yahay awgeed, ayaa waxa keliya ee taageero loo fidiyaa kuwa ugu liita dadka tabaalaysan oo iyagana si gaar ah arrintooda loo tixgeliyo/caawiyo.

UNHCR
The UN Refugee Agency

Contact : Catherine Weibel
UNHCR Branch Office Somalia
Tel: 254 20 422 2000
weibel@unhcr.org